DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

FAAFINTA الجريدة الرسمية RASMIGA

DAWLAD A PUNTLAND EE SOOMALIA لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 37-aad. Garowe 15. 12.2017 Lam.12.

Faafinta bil walba soo baxda جريدة الشهرية

*Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland*

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyaywuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

Qaybta Koowaad

Ansixinta Xeerka ka-hortaga daabulka iyo ka-ganacsiga dadka puntland.

Qaybtalabaad
Xeer
Waxba ma leh
Qeybta Saddexaad\
Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.
Waxba ma leh

*Xeer LR .10. ee 15/12/2017, kuna saabsan ansixintaXeerka ka hortagga daabulka iyo ka-ganacsiga puntland.*

Dawladda Puntland ee Somaliya | Puntland State of Somalia

Xeerka Lr.10. ee16/12/2017, kuna saabsan ansixinta Xeerka ka-hortagga daabulka iyo ka-ganacsiga dadka puntland.

Madaxweynuhu,

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta GolahaWakiilada Puntland eeSummad XGGW/DPLS/107/2017 Garowe,jimce. Date:30/11/2017;

Markuu tixgeliyey:Muhiimadda xeerkan ka hortagga daabulka iyo ka- ganacsiga dadka u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka ka hortaga daabulka iyo ka-ganacsiga puntland.

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, XafiiskaXoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPLS.

### Qodobka 3-aad

Dhaqan galka Xeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland, cid kastana ay waajib ku tahay inay dhawrto, kuna dhaqanto.

**Prof Cabdiweli Maxamad Cali Gaas.**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

*Ref:-*XGGW/DPL/ 107 / 2017 Garoowe, Khamiis Date:- 30/11 /2017

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeeddo:- **Ansixinta Xeerka Ka-hortagga Daabulka iyo Ka-ganacsiga Dadka ee Puntland**

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-

MARKUU ARKAY: Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64-aad.**

MARKUU ARKAY: Soo gudbinta Madaxweyne ku xigeenka DPL **Ref: MWK/DPS/515/2016 ee November 28/2016** kuna saabsan soo gudbin Ansixin Xeer.

MARKUU TIXELIYEY: Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka ka-hortagga Daabulka iyo ka-ganacsiga daka Puntland.

MARKUU ARKAY: Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhigii 40-aad fadhigii 13-aad ee 18/11/2017 Xeerka Ka-hortagga Daabulka iyo Ka-ganacsiga dadka ee Puntland.

Wuxuu Guddoomiyey:

Ansixinta Xeerka Ka-hortagga Daabulka iyo Ka-ganacsiga dadka ee Puntland

Allaa Mahad Leh

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladda – Speaker of the House of Representatives – PUNTLAND STATE

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

# Xeerka Ka-hortagga Daabulka iyo Ka-ganacsiga Dadka ee Puntland

Garoowe, November/2017

## CUTUBKA KOOWAAD
## GOGOLDHIG GUUD

### Qodobka 1-aad
### Cinwaanka

"Xeerka Ka-hortagga Daabulka iyo Ka-ganacsiga Dadka ee Puntland.

### Qodobka 2-aad
### Dabbaqaada

Xeerkan waxaa lagu dabbaqayaa noocyada kala duwan ee daabulka iyo ka-ganacsiga dadka, falkana uu galey muwaadin ama ajanabi, oo la xiriira dambiyada Xeerku xusayo.

### Qodobka 3-aad
### Eray Bixin

Xeerkani wuxuu qeexayaa erayada soo socda:-

1. Fal dembiyeedka daabulka iyo ka-ganacsiga dadka micnihiisu waa fal dembiyeed kasta ee ku sifooba astaamaha Xeerkani qeexayo.
2. Ilmo waa qof sideed iyo toban (18) sano ay da' diisa ka yar tahay.
3. Daabul iyo ka-ganacsi dadka waa abaabulka, safrinta, daabulinta, hayn ama qaabilid qof, micnahana yahay hanjabaad ama xoog sheegasho, ama siyaabo kale oo khasbid, qafaalid, khiyaano, awood sheegasho ama ka-faaiideysi nugulnimada qof, ama siin ama guddoomid lacag ama faaiido si loo hanto oggolaashaha qof masuul ka ah qof kale, falku ha ka dhaco dalka guddihiisa ama ka-gudbin xuduud, ujeeddaduna tahay ka-faa'iideysi ama fududeyn ka-faa'iideysiga qof kale.
4. Ka-faaiideysi micnihiisa waa fal ku dhaca oggolaanshaha ama oggolaansho la'aanta dhibbanaha, oo noqon Kara shaqo ama adeeg khasab ah, addoonsi ama falal la mid ah addoonsi, cadaadis, khasab kaga qaadis, jir-dilid, Galmo xaaraan ah, ama isticmaalid qof kale shaqadiisa ama xirfadiisa, si loo helo macaash hantiyeed iyo mid kalaba (qod. 407/1 x.c.)
5. Ka-faiideysi jir ka-ganacsi waa ka qeyb-gelin Galmo xaaraan ah ama so-saarid sawiro iyo aflaan galmood, qof ku sugnaan xaalad hanjabaad, khiyaano, xoog u-sheegasho, qafaal, ku tagri fal awoodeed, deyn u haysasho ama nugulaanshaha dhibbanaha (qod. 407,408 x.c.).
6. Abaabulid micnaheeda waa ficil kasta sida qancin, soo aruurin ama ka fogeyn qof qoyskiisa ama bulshadiisa.
7. Shaqo khasab ah waa shaqo ama adeeg lagu helayo ama lagu maamulo xoog, baqdin gelin ama qaab kale oo khasab ah ama cadaadis jireed (qod. 14 D.k.M.G., qod. 6 x. sh.).
8. Addoonsi waa xaalad qof la geliyo, loona adeegsado awood lahaansho, loona isticmaalo qaababka lahaanshaha (qod. 455 x.c.)

9. Falalka u eg ama la mid ah addoonsi sida uu qeexayo Lifaaqa Axdiga Tirtiridda addoonsiga iyo Ka-ganacsiga Addoonsiga iyo falalka la midka ah addoonsiga oo ay ka mid yihiin u haysasho deyn, adeegsi gumeysi, guur khasab ah ama mid adeegsi ah iyo u dhalid caruur si loo isticmaalo (qod. 14 D.K.M.G., qod. 468 x.c.).
10. Adeegsi ama qabbaanid waa xaalad hoos joogid, taaso keenta in shaqada iyo adeega qof lagu hanto hanjabaad ama dhaawac culus loo geysto qofkaas ama qof kale, ama la isticmaalo qaab ama xeelad si qof uu u aamino in haddii uusan shaqadaas ama adeegaas qaban, in waxyeelo culus asaga ama qof kale gaari doonto (qod. 464 x.c.).
11. La bixid xubno dadeed oo sharci daro ah, waa fal aan waafaqsaneyn Sharciga iyo qaabka caafimaadka ee oggolaanshaha saaridda xubnaha.
12. Gelitaan Sharci daro ah waa ka gudbid xuduud ayadoon la heysan shuruudihii dal ku-gal sharciyeed ee wadan shisheeye.
13. Dhibbane daabul iyo ka-gancsi waa qof la galiyey xaalad: abaabulid, safrin, daabulin, hayn, maareen iyo shaqo ama adeeg khasab ah, loona adeegsaday qiyaano, cadaadis, ujeedaduna tahay ku khasbid adeeg, deyn furasho, addoonsi ama ka-ganacsi jireed.
14. Cid kasta macnaheedu waa shakhsi ama koox abaabulan ee gaysata fal dembi daabul iyo ka-ganacsi dadeed.
15. Koox dembiile abaabulan waxaa loola jeeda, koox dad ah ama hanti/agab abaabulan oo aan Sharciga waafaqsaneyn.
16. Ku tagri-falid xaalad nugulaasho, waa marka qof la gaarsiiyo xaalad uu aamino in uusan lahayn fursad kale aan ahayn in uu fuliyo shaqada iyo adeega laga codsaday.
17. Daabulid macnaheedu waa ka kaxeeyn qof ama dad goob ama u dhoofin goob kale.
18. Khasab waa fal kasta oo la adeegsado ama aan la adeegsan qalab, cabsi geliya xag jireed ama maskaxeed, qalqal galiyana nolosha ama jirka qof, ama sababi Kara in uu qof waayo xorriyadiisa.
19. Hanjabaad waa fal kasta oo Sharci darro ah ee la isticmaalo sida cod, qoraal, sawirro, astaamo, dhaqdhaqaaq jireed, ha la adeegsado ama yaan la adeegsan qalab.
20. U haysasho deyn waa fal kasta oo qof ama eheladiisa ama qof uu masuul ka yahay, lagu geliyo xaalad adeeg qasab ah oo nooc deyn-bax ah.
21. Qaan-bax waa kharashka loo xukumo dhibbanaha iyo cidda leh nafaciisa, khasaaraha mood iyo waxyeelo ka soo gaara falka dembiiluhu u geystay (qod.158 x.c.).
22. Dhaqan-celin macnaheedu waa ka kabasho dhibaatadii jireed, nafsadeed iyo bulshadeed, si dhibbanaha uu u helo mudnaantii uu ku lahaa qoyska iyo bulshadaba.
23. Ereyada aan lagu qeexin qodobkaan waxaa lagu fasiraya, sida ku aadan isticmaalkooda Xeerarka kale ee Soomaaliya/Puntland ka jira.

## Qodobka 4–aad
## Ujeeddada Xeerka

1. Ujeeddada xeerkani waa in la helo nidaam qaanuuneed oo loo adeegsado la dagaalanka iyo ciribtirka daabulka iyo ka-ganacsiga dadka, gaar ahaan dumarka iyo carruurta.

   *Sidoo kale* Xeerkani wuxuu qeexayaa dembi ahaanshaha falka daabulka iyo ka-ganacsiga dadka iyo qaabka daryeelka dhibbanayaasha, markhaatiyada iyo cid kasta oo ka xog-bixisa dembigaan.

2. 2-Ujeedada Xeerku waa:-

   b) Ka-hortagga iyo la-dagaalanka daabulka iyo ka-ganacsiga dadka.

   t) Difaacidda dhibbanayaasha daabul iyo ka-ganacsi.

   J) Xaqiijinta eedeynta, ayadoo la dhowraayo xuquuqda qofka.

   x) Horumarinta is-kaashiga caalamiga ee la dagaalanka daabulka iyo ka-ganacsiga dadka.

## Qodobka 5–aad
## Muhiimadda dabbaqaada Xeerka

1. Xeerkan waxaa la dabaqayaa ayadoon loo kale eegin in fal dembiga uu ka dhacay ama ka dhicin Puntland, haddii ay jiraan daruufaha so socda:

   b) Haddii Puntland tahay dalka guddooma ama goobta tacaddiga uu ka dhacay.

   t) Haddii dalka guddoomaya uu yahay dal shisheeye, balse daabulka iyo ka-ganacsiga ay ka bilaabmeen guddaha Puntland.

   j) Puntland tahay dhul sii mar ah ama halka la-daabuliyaha uu degganaa xiliiga fal dembiga uu dhacay.

## Qodobka 6-aad
## U cabashada Booliska iyo soo xiridda Eedaysnaha

1. Qofka ay dhibi kasoo gaadho faldembiyeedka Daabulka wuxuu dacwad u gudbin karaa Xeer-ilaalinta iyo Booliska si loo bilaabo dacwadda faldanbiyeekaas ka dhashay.
2. Qaabka warbixinta iyo dacwadu wuxuu noqonayaa qoraal ama af.
3. Boolisku waa in ay dhibbanaha ka caawiyaan sida uu u heli lahaa daryeel iyo magdhaw madani ah ee ku waajibaya eedaysanihii khasaarihii uu keenay fademnbiyeedkii daabulka ahaa ee uu geystay.

## Qodobka 7-aad
## Fal Ciqaabeedka

Ciqaab marinta dembiga ku xussan xeerkan, kuma xirna dacwad, cabasho ama xog ay dhibbanaha iyo qareenkiisa soo gudbiyaan.

## Qodobka 8–aad
## Oggolaanshaha dhibbanaha

Oggolaanshaha dhibbane daabul, oo lala damacsan yahay ka-faaiideysi iyo hagardaamo, tixgelin ma mudna, hadiiba la isticmaaley falalka ku xussan qodobka 13-aad ee Xeerkan.

## Qodobka 9–aad
## Ka-dulqaadid dembi

1. Dhibbanaha daabulka iyo ka-ganacsiga laguma eedeyn karo, dembi la xiriira socdaalka ama dembi kasta uu ku galo xaaladiisa ee la-daabuliyey iyo laga ganacsaday.
2. Dembiyada Dhibbanaha daabulka iyo ka ganacsigu galo isagoo isdifaacaya waxaa loo tixgalinayaa isdifaacid.

## Qodobka 10–aad
## Xog-bixin khasab ah

1. Hawlwadeennada laanta socdaalka, dekadaha, booliska xuduudaha, dhakhhatiirta, shaqaalaha caafimaadka, shaqaalaha dawladda oo dhan iyo dhamaan shacabka oo dhan ee ogaada xog la xiriirta daabul iyo ka-ganacsi dadeed, waxa waajib ku ah in ay wargeliyaan laamaha dawladda ee arrinta ku hawl leh.
2. Hawlwadeennada booliska ee hela xog ama warbixin waxa ku waajib ah, in ay dardar galiyaan dambi baaris ku wajahan dacwad ku oogidda eedeysanaha/eedeysanayaasha.

# CUTUBKA LABAAD
# Ka-Hortag iyo Daryeel

## Qodobka 11–aad
## Ka-hortagga

1. Ka-hortagga fal dembiyeedka daabulka iyo ka-ganacsiga dadka, waa in uu ahaadaa mid hawlgala xilliga ugu horreeya ee suurto gal ah.
2. Dawladda waxaa waajib ku ah tallaabooyin ka-hortag iyo sidii loo wajihi lahaa dambiga daabulka iyo ka-gancsiga dadka.
3. Dawladda waxaa xil ka saaran yahay soo saaridda siyaasad, barnaamijyo iyo hawlgallo, ayna

qoondeyso maaliyaddii hawlgalka ka-hortagga dembiga daabulka iyo ka-ganacsiga dadka.

## Qodobka 12–aad
## Daryeelka

I. Madaxweynuhu wuxuu magacaabayaa Guddiga La-dagaalanka Daabulka iyo Ka-ganacsiga Dadka (GLDDKGD), oo ka kooban hay'adaha dawladda, ciidamada, ururada bulshada, ururada xirfadlayaasha kalana ah xubnhaan hoos ku qoran:

1. Xafiiska Xeerilaalinta Guud ( Gudoomiye)
2. Wasaardda Haweenka iyo ARR/qoyska ( Gudoomiye ku xigeen)
3. Wasaraadda Caddaaladda — Xubin
4. Wasaraadda Amniga iyo DDR — Xubin
5. Wasaaradda Caafimaadka — Xubin
6. Xubin ururada Bulshada ah — Xubin
7. Xubin ururada xirfadlayaasha caafimaadka — Xubin

II. Guddigu wuxuu u xil saaran arrimahaan soo socda:

b)Hindisidda siyaasadda la dagaalanka Daabulka iyo Ka-ganacsiga Dadka.

t)Kormeeridda hawlgallada daryeelka dhibbanayaasha sida, dhaqan-celinta, dib u celinta iyo dib ugu soo-celinta bulshada.

j)Kormeeridda ciidamada

x)Hoggaaminta hawlaha ka hortegidda fal dembiyeedkaan iyo daryeelka dhibbanaha.

Kh)Abaabulidda u qareenidda, is-dhexgalka, is-kaashi iyo tababarada.

d)Soo saarid warbixinno iyo qiimeyn.

# CUTUBKA SEDDEXAAD
# FAL DEMBIYEEDKA DAABULKA IYO KA-GANACSIGA DADKA

## Qodobka 13–aad
## Falalka daabulka iyo ka-ganacsiga dadka

Waxaa ka reebban cid kasta, shaqsi ama qof qaanuuni ah, in uu galo ama kasbo ama fududeeyao falalka soo socda:

1. Abaabulid, safrin, daabulin, soo xarrayn ama qaabilid qof, ujeedaduna tahay u galmood, muqaalo galmo ama xiriir jinsiyeed, ka-faaiideysto jir ka-ganacsiga, shaqo iyo adeeg qasab, addoonsi ama u haysasho deyn.
2. Fududeyn si loo helo lacag, macaash, dhaqaale ama arrimo kale, in cid kale ay qof iibiso, gadato,

ka-ganacsato, u galmood, u isticmaasho jilidda muuqaal galmo ama xiriir jireed, shaqo ama adeeg qasab ah ama u haysato furasho deyn.

3. Ku qasbid ama ku heyn qof galmo Xaaraan ah ama jilid muqaal galmo ama xiriir jireed (qod. 408 x.c.).
4. Korrin ama fududeyn korrin ilmo, ujeedadana tahay u adeegsi galmo, jilid muqaal galmo ama xiriir jireed, ka faa'iideysi jir, shaqo iyo adeeg qasab ah, iyo adoonsi.
5. Abaabulid, hawlgelin, korin, safrin, qafaalid qof, lana isticmaalo cabsiin ama awood sheegasho, been-abuur, khayaano, jir iyo maskax dil, qasab ama cabsiin, ujeedaduna tahay la-bixid ama iibin xubnaha, qofkaas.
6. Qof kasta oo gala dembiga ku xussan faracyada 1,2,3,4,5 ee qodobkaani, waxaa lagu ciqaabayaa 8 (sideed) ilaa 15 (shan iyo toban) sano oo xarig ah (qod. 96 x.c.) iyo ganaax lacageed oo dhan $4000 ilaa $7000 USA Doolar. (qod. 97 x.c.).

## Qodobka 14–aad
## Falalka daabulka iyo ka-ganacsiga ilmaha

Abaabulinta, safrinta, daabulinta ama soo xareeynta ilmo, ujeeddaduna tahay ka-faa'iideysi ama u isticmaal arrimo ciidan, waxaa lagu micneyn daabul iyo ka-ganacsi dadeed, xataa hadii aysan dhicin falalka ku xussan qodobka 13-aad ee Xeerkan.

Qof kasta oo gala dembiga daabul iyo ka-ganacsi ilmo, waxaa lagu ciqaabaya toban (10) ilaa labaatan (20) sano oo xarig ah (qod. 96 x.c.) iyo ganaax lacageed oo dhan $7000 (todoba kun) ilaa $9000 (sagaal kun) USA Doolar. (qod. 97 x.c.).

## Qodobka 15-aad
## Falalka gacansiinta abaabulka iyo fududaynta ka-ganacsiga dadka.

Waxaa reebban abaabulka iyo fududeynta daabulka iyo ka-ganacsiga dadka ee falalka soo socda:-

1. Oggaansho, kireyn ama sii kireyn, isticmaal ama oggolaansho isticmaal guri, dhismo ama xarun, ujeeddaduna tahay abaabul daabul iyo ka-ganacsi dad.
2. Soo-saaridda, daabacaadda ama qeybinta waraaqo loo ekeysiiyo kuwa nadaamka dawladda waafaqsan, sida kuwa dhoofitaanka iwm, ujeeddaduna tahay fududeynta daabulka iyo ka-ganacsiga dadka.
3. Xayeysiin, soo saarid, daabacaad, baahin, qeybin ama kasbid xayeysiis, soo saarid, daabacaad, baahin ama qeybin loolana jeedo micne kasta, sida aaladaha warbaahinta, internet-ka, qoraallo, ama qalab dacaayadeed, oo fududeyn kara daabulka iyo ka-ganacsiga dadka.

4. Ka qeyb qaadasho falal, ka been sheegid ama khiyaano, loogana danleeyahay fududeynta soo saaridda waraaqaha dawladda ee diiwaan gelinta bixitaanka iyo adeegyada sodcaalka, ujeeddaduna tahay daabulid iyo ka ganacsi dadeed.
5. Fududeyn bixitaanka ama soo gelidda dal, Garoomada diyaaradaha, xuduudaha barriga iyo dekedaha, dad haysta waraaqado socdaal oo aan sax ahayn, ujeedadana tahay daabulin iyo ka-ganacsi dadeed.
6. *Qafaalid ama jeexjeexid baasaboorka, waraaqaha socdaalka ama waraaqaha aqoonsiga ee qof* laga ganacsadey (qod. 379 x.c.)
7. Ka macaashid ama isticmaalid xoogga ama adeega qof ku sugan xaalad shaqo iyo adeeg khasab ah ama addoonsi (qod. 464 x.c.)

   Qof kasta oo abaabula daabul iyo ka-ganacsi dadeed waxa lagu ciqaabi 3 (seddex) ilaa 7 (todobo), Sano oo xarig ah (qod. 96 x.c.) iyo ganaax dhan $2000 ilaa $4000 USA Doolar. (qod. 97 x.c.).

## Qodobka 16 –aad
## Noocyada cul-culus ee daabulka iyo ka-ganacsiga dadka

Falalka iyo duruufaha qaarkood waxa loo tixgelinayaa ka-ganacsi culus.

1. Ka-ganacsi dadeed ee culus waxuu jiraa:

   b) Haddii qofka la daabulinayo ama laga ganacsanayo uu yahay ilmo ama naafo.

   t) Haddii qofka falka geystey uu yahay waalid, walaal, la fir, xanaaneeye ama masuul ka yahay qofka la daabuliyey ama laga ganacsadey.

   j) Korriin qof looga dan leeyahay in loo isticmaalo galmaysiin iyo arrimo la xiriira, shaqo qasab ah, addoonsi, adeeg qasab ah ama u haysasho deyn.

   x) Falka haddi ay geysteen koox abaabulan ama si baahsan loo sameeyo.

   Kh)Haddi qofka laga gancasanayo sababo la xiriira xaaladda uu dhinto, waasho, naafoobo, qaado cuduradda la kala qaado ama cuduro kale.

   d) Falka haddi u geysto sargaal dawladeed, hoggaamiye siyaasadeed ama diineed

   r) Haddi jirdil iyo cadaadis maskaxeed la adeegsado, si dhibbanaha loogu khasbo in uu geysto falal ama u qaado cuduro culus.

   s) Haddii la adeegsado awood dawladeed.

2. Daabul iyo ka-ganacsiga wuxuu ku sifooba fal koox abaabulan, marka falka ay gestaan labo qof iyo ka badan falalka noocaan ah cidda ay ku caddaadaan waxaa lagu ciqaabayaa 15sano illaa 24 sano oo xarig ah iyo ganaax dhan 7000$ illaa 9000$ oo Doollar USA.

## Qodobka 17–aad
## Mas'uuliyadda qofka Qaanuuniga ah

1. Fal kasta oo ku xusan Xeerkan haddii lagu galo dhaqaale, qalab, agab, shaqaale ama hanti uu leeyahay qof qanuuni ah, masuuliyadda waxa leh hoggaamiyaha, maamulaha, guddoonka iyo cid kasta oo masuul ah, oo ka qeyb qaata dembiga ama oggaansho ku oggolaadey ama aan ka hor tegin dembigaas.
2. Haddii uu falka ku dhaco fulinta danaha qofka qaanuuniga ah, hawlwadeennadda ku xussan faqrada 1aad, si wadar ah ayey u saaran tahay masuuliyadda, bixinta kharashka Maxkamadda, ganaaxyada, caymiska iyo qaan-sheegadka.

   Haddii falka uu yahay mid lid ku ah rabitaanka guddoonka ama maamulka shirkadda, waa masuuliyad shaqsiyeed.
3. Haddii dembiga lagu galey hanti uu leeyahay qofka qaanuuniga ahi, sida qaabilaad, gaadiid, hanti, agab ama qaab kale, xarumo, kheyraad, badeeco, qalab, macaash lagaga faaidaystey ka-ganacsiga dadka, dawladda ayaa la wareegeysa.
4. Shatiyada, diiwaangelin kasta ee uu leeyahay qofka qaanuuniga ah ee ku xusan qodobkan, waa la tirtiri waana la joojin hawlaha dhaqaale. Dadka ku xusan farqada 1-aad ee qodobkan, waa ka mamnuuc in ay ka shaqeeyaan hawlahaan oo kale, xataa haddey ku wareegaan shirkad kale (qod. 107 x.c.).
5. Qof kasta oo qaanuuni ah ee gala dembiga daabul iyo ka-ganacsiga dadka, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan 20,000 illaa 50,000 USA Doollar. (qod. 97 x.c.)
6. Haddii uu fal dembigaan uu ku dhacay amar, fal ama ka gaabin bixin amar ama fal ku waajiba maamulka ama cid kasta oo u xil saaran hawlaha qof qaanuuneedkaan, waxa lagu ciqaabayaa 6 (lix) ilaa 12 (labo iyo tabban) sano oo xarig ah iyo ganaax dhan $4000 ilaa $7000 USA Doollar.

## Qodobka 18–aad
## Qafaalid ama isticmaal khaldan ee waraaqaha aqoonsiga

1. Cid kasta iyo shakhsi kasta ee qanuuneed, waa ku Sharci darro, falalka so socda:
   b) Is hortaag xaafidaadda, isticmaalka warqadaha aqoonsiga, baasaboorka ama/iyo dokumenti socdaal ee qof kale.

   t) Hanasho, qarin ama baabi'in warqadaha aqoonsiga, baasaboorka ama dokumenti kale ee socdaal, si loo xaddido qof kale xorriyadiisa dhaqdhaqaaq ama si loogu khasbo shaqo iyo adeegyo (qod. 379 x.c.).
2. Cid kasta oo gasha dembigaan waxaa lagu ciqaabayaa 3 (seddex) ilaa 7 (todoba) sano oo xarig ah iyo ganaax dhan $1000 ilaa $3000 USA Doollar.

## CUTUBKA IV
## Daryeelka dhibbanayaasha iyo Markhaatiyada

### Qodobka 19–aad
### Difaac Sharciyeed

La daabuliyaha ama qofka laga-ganacsadey waxaa loo aqoonsanayaa dhibbane, sidaa awgeed looma ciqaabi karo dembiyada la xiriira daabulka iyo ka-ganacsiga, ku xusan Xeerkan, ama uu ku galo u hoggaansanaanta amarka cidda daabulineysa ama ka-ganacsaneysa qudhiisa.

Tixgelin ma mudna oggolaanshaha dhibbane laga ganacsadey sida ku qeexan Xeerkaan.

### Qodobka 20–aad
### Adeeg daryeel

1. Si loo hubiyo soo kabashada, dhaqancelinta, dib ugu soo celinta bulshada dhibbanaha, hay'adaha dawladda ay khussayso arrintani, waa in ay u diyaariyaan adeegyada so socda:
   b) Hooy ama guryo ku haboon duruuftooda.
   t) La-talin.
   J) Gargaar Sharci oo lacag la'aan ah, ku wargalin xuquuqaha, ka saacididda qoraalka cabashada, codsiga magdhawga iyo adeegyada kale, fasiraad luuqad ay garan karaan.
   x) Adeeg cafimaad.
   Kh) Tababar xirfadeed.
   d) Waxbarashada ilmaha
2. Guddiga La Dagaalanka Daabulka iyo Ka-ganacsiga Dadka (GLDDKGD), ayaa u xil saaran, kormeerka iyo dhaqan gelinta barnaamijyada daryeelka, sida soo kabashada iyo dhaqan-celinta dhibbanayaasha.

### Qodobka 21–aad
### Dahsoonaanta Dacwada

1. Heer kasta ee baarista, eedeynta ee kiis hoos yimaada Xeerkaan, waa in hawlwadeennada sida Xeer-ilaalinta, Garsoorayaasha, shaqaalaha Maxkamadda, saraakiisha ciidamada, dhakhaatiirta iyo qeybaha dacwadda, ilaaliyaan xuquuqda qarsoodiga ee dhinacyada dacwadda. Sidaas awgeed hawlwadeenada ciidamada, Xeer-ilaalinta, Garsoorka, ayagoo tixgelinaya duruufaha danta u ah dhinacyada, waxay amri karaan baaris iyo dacwad albaabada u xiran yihiin.
2. Haddii baarista iyo dacwada ay yihiin kuwo albaabadu u xiranyihiin, waxaa mamcuuc ah in soo-saare, qoraa, tabiye, ay daabacaan ama faafiyaan qoraallo dacwada khuseeya. Sidoo kale

telefishinka, raadiyaha, filin qaade ama abaabule filin, cid kasto adeegsata aaladaha warbaahinta iyo tiknoolojiyada nooc kasta, waa ka mamnuuc in ay xayeysiiyaan ama faafiyaan dacwadaha daabulka iyo ka-ganacsiga dadka.

3. Cid kasta oo ilaalin wayda amarka Maxkamadda ee baaris ama dacwad albaabadu u xiran yihiin, faafiyana xog heer kasta ee dacwada, waxaa lagu ciqaabaya 3 (seddex) ilaa 5 (Shan) sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexeya $3000 ilaa $4000 USA Doolar.

## Qodobka 22–aad
## Daryeelka Markhaatiyada iyo Dhibbanayaasha

1. Markhaatiyada iyo dhibbanayaasha ee daabul iyo ka-ganacsi dadeed, waxay xaq u leeyihiin in la ilaaliyo dahsoonaanta iyo shaqsiyadoodaba.
2. Haddii markhaatiyada ama dhibanayaasha iyo eheladooda loo geysto hanjabaad khatar gelin karta naftooda ama hantidooda, booliska waa in ay xaqiijiyaan amnigooda inta lagu guda jiro iyo ka dib dacwadaba.

## Qodobka 23-aad
## Dhibbanayaasha ajnabiga ah

Dhibbanayaasha ajnabiga ah, waxay xaq u leeyihiin daryeel, gargaar iyo adeegyada loogu talo galey dhibbanayaasha Xeerkaan hoos yimaada. Maxkamadda ayaa go'aamin karta sii joogidooda Puntland, muddada ay socoto dacwadda ay dhinaca ka yihiin (qod. 20 Dastuurka Puntland).

## Qodobka 24–aad
## Dib u celinta dhibbanayaasha

1. Waaxda Socdaalka ayadoo kaashaneysa Guddiga Ka-hortagga Daabulka iyo Ka-ganacsiga Dadka (GKHDKGD) ayaa maamuleysa dib u-celinta dhibbanayaasha, ayadoon loo eegin in ay Sharci leeyihiyiin iyo in kale.
2. Haddii dib u-celintu ay dhibbanaha u keeni karto khatar, Waaxda Socdaalku waxay Dawladda ka codsan kartaa in la siiyo degganaasho iyo daryeel sharciga waafaqsan.

## Qodobka 25–aad
## Magdhawga Dhibbanaha

1. Qofka lagu xukumo dembiga daabul iyo ka-ganacsi, ciqaabaha kale waxa u wehelin doona in uu magdhaw siiyo dhibbanaha.

2. Magdhawgu wuxuu ka koobnaan doonaa, waxyeelada nafsiyadeed, jireed iyo dareen, hanti ka luntay, mushaaro ka maqan ama qiimaha shaqo iyo adeeg ee uu qabtay.
3. Magdhawga ku xusan faqrooyinka (1) iyo (2), waxaa wehelin kara in ay Maxkamadda ayadoo

Tixgelinaysa codsiga xeer-ilaalinta u xukunto Dawladda iyo cid kale, in uu dembiiluhu bixiyo kharashkii kaga baxay dacwada.

## Qodobka 26–aad
## Kaydka daryeelka iyo ka-hortagga daabulka iyo ka-ganacsiga dadka

Waxaa la abuuri doonaa kaydka maareynta arrimaha daabulka iyo ka-ganacsiga dadka

1. Ilaha kaydkan waxey ka koobnaan doonaan:
   b) Lacago Dawladda u qoondeyso, maareynta arrimaha daabulka iyo ka-ganacsiga dadka.
   t) Lacago ay yaboohaan shaqsiyaad, ururo, shirkado, hey'ado iwm
   j) Lacagaha ka soo xarooda ganaaxyada, hantida lala wareeggay ee lala xiriirinayo dembiga Xeerkan ku xusan.
   x) Deeqaha xiriirada laba geesoodka iyo iskaashiyada kaleba.
   Kh)Lacago ka yimaada ilo kale, oo ay oggolaato Wasaaradda Maaliyadda.
2. Lacagahan waxaa si khaas ah loogu isticmaali Karaa barnaamijyada ka-hortagga, daryeelka, dhaqan-celinta, dib ugu soo-celinta bulshada dhibanayaasha.

   Barnaamijyada waxaa ka mid ah:
   b) Wax kasta oo la xiriira daryeelka, dhaqan-celinta, iyo bulsho ku soo-celinta dhibbanayaasha.
   t) Waxyaabaha asaasiga u ah dhibbanayaasha.
   j) Tababarada iyo tayaynta xirfadeed ee dhibbanayaasha.
   X)Tababarada iyo tayaynta hawlwadeenada daryeelka, dhaqan-celinta iyo wixii la xiriira.
   Kh)Barnaamijyada arrurinta, kaydinta xogaha, kormeeridda iyo qiimaynta.
   d) Abaabulidda shirar, tababaro si loo gaaro aragti ay ka mideysan yihiin bulshada, hay'adaha dawladda iyo ururada bulshada.
   r) Baahinta aqoonta iyo maareynta olole wacyigelin ka-ganacsiga dadka.

# CUTUBKA V
# ISKAASHIGA CAALAMIGA AH IYO KAALINTA BULSHADA

## Qodobka 27–aad
## Iskaashiga

1. Si loo xoojiyo ka-hortagga iyo dabargoynta falalka daabulka iyo ka-ganacsiga dadka, Dawladda Puntland waxaa ku waajib ah in ay horumariso xiriirada iskaashiga caalamiga, ha ahaadaan kuwa

laba geesoodka ah ama goboleedkaba.

2. Iskaashiga ku xusan faqrada (1) wuxuu ku dhisnaan karaa, iskaashi gargaar dhinaca sharciga iyo farsamada.

## Qodobka 28–aad
## Kaalinta bulshada

1. Bulshada waxay ka qeyb qaadaneysaa saacidaadda ka-hortagga daabulka iyo ka-ganacsiga dadka iyo gargaarka dhibbanayaasha.
2. Ka qayb galka bulshada ku xusan faqrada (1), wuxuu noqon karaa xog-bixin iyo/ama u gudbin warbixinno booliska iyo hawlwadeennada ay khuseyso falalka daabul iyo ka-ganacsi ay ka warhelaan, ama ka qeyb galka daryeelka dhibbanayaasha fal dembiga daabulka iyo ka-ganacsiga dadka.

## CUTUBKA VI
## GUNAANAD
## Qodobka 29-aad
## Dabbaqaadda heerarka shaqo

1. Waxaa si siman loogu dabaqaaya heerarka shaqo ee ku xusan xeerarka Shaqaalaha ee Somaaliya/Puntland, qofka leh ama kaan lahyn ruqsad shaqo ee Puntland.
2. Wasaaradda Shaqaalaha ayaa baareysa dacwadaha xaaladaha shaqada Sharci darada ah, iyadoo la eegin xaalada tahriib ee dacwoodaha iyo nooca shaqo ama adeeg.

## Qodobka 30–aad
## Wakhtiga kala guurka

Marka xeerkani dhaqan galo, kiisaska daabulka iyo ka-ganacsiga oo weli baaris ama maxkamad ku socdaan, waxaa loo adeegsanayaa xeerarkii hore.

## Qodobka 31-aad
## Burin

*Waxaa la buriyay xeerkasta oo ka horimanaya xeerkan.*

## Qodobka 32–aad
## Hirgelinta Xeerka

Xeerarka dhaqangelinta ee hoos yimaada Xeerkan waa in lagu sameeyaa lix (6) bilood gudahooda, marka uu Xeerkan dhaqangalo.

## Qodobka 34–aad
## Dhaqan galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markii uu golaha wakiiladu ansixiyo, Madaxwaynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee dawladda.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**